

Dib-u-furidda Xeeladaha yareynta CAABUQA COVID-19-ban ee 2021-2022

Degmadu Ma u baahan doontaa Fool-saab/Maaskaro?

Haa. Degmadu waxay uga baahantahay dhammaan ardayda, shaqaalaha, iyo booqdayaasha inay xirtaan fool-saabka/maaskarada iyadoo aan loo eegin xaaladda talaalka ee gudaha dhismayaasha iyo basaska dugsiga bilowga sannad-dugsiyeedka 2021-2022 kuna salaysan hagitaan talada ka imaanaya Xarumaha Xakamaynta iyo Ka -hortagga Cudurrada (CDC), talooyin ka imaanaya Akadeemiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta (AAP) iyo Waaxda Caafimaadka Ohio (ODH), iyo la -tashiga Caafimaadka Dadweynaha Columbus (CPH).

Maxay Hadda Yihiin Hagidda/Tilmaan -bixiyaha Caafimaadka Dadweynaha ee Dib-u-furidda?

- [**Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada \(CDC\) /The Centers for Disease Control and Prevention \(CDC\)**](#) waxay ku talinaysaa in dhammaan dadka, la talaalay iyo haddii aan latalaalinba, ay ku xirtaan gudaha fool-saab/maaskaro. Hay'addu waxay sidoo kale ku talisay in carruurta ay xirtaan fool-saab/maaskaro gudaha dugsiyada dayrtan.
- [**Waaxda Caafimaadka Ohio \(ODH\) Ohio /Department of Health \(ODH\)**](#) waxay si xoog leh ku talineysaa in dugsiyadu hirgeliyaan xirashada fool-saab/maaskaro loogu talagalay ardayda oo ku lakabaysan xeelado kale oo ka hortag ah si loo ilaaliyo dadka aan si buuxda loo talaalin.
- [**kadeemiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Caruurta \(AAP\) /The American Academy of Pediatrics \(AAP\)**](#) waxay ku talinaysaa xirashada guud ahaan fool-saabka/maaskaro ee dugsiyada qof kasta oo ka weyn 2-bo sano, iyada oo aan loo eegin heerka talaalka (haddii aysan jirin xaalado caafimaad ama koritaan/horumarineed oo mamnuucaya adeegsiga/isticmaalka).
- [**Waaxda Gaadiidka ee Maraykanka \(USDOT\) /The U.S. Department of Transportation \(USDOT\)**](#) ayaa soo saartay sharci federaal ah oo u baahan in lagu dhax xirto fool-saabka/ maaskarada dhammaan gudaha gaadiidka dadweynaha, oo ay ku jiraan basaska dugsiga.

Maxaa Looga Baahan Yahay Dadka/Shakhsiyadka La Talaalay Inay Xirtaan Fool-saabka/Maaskarada?

- AAP waxay ku talineysaa guud ahaan xirashada fool-saabka/maaskarada maxaa yeelay qayb weyn oo ka mid ah bulshada ardayda oo aan weli u-qalmin/xaq u-yeelan talaalada, waxaana la caddeeyey fool-saabka/maaskarada inay yareyneyso gudbinta fayraska iyo inay ka ilaaliso kuwa aan la talaalin.

- CDC waxay ku talinaysaa in dhammaan dadka, iyadoon loo eegin heerka talaalka, waa inay gudaha xirtaan fool-saab/maaskaro sababta oo ah dadka la talaalay waxay awoodaan inay faafiyaan fayraska CAABUQA COVID-19-ban.
- Isku-darka lakabyo ilaaliya oo ay ku jiraan talaalada, fool-saab/maaskaro, iyo nadaafadda gacmaha oo nadiif ah ayaa ka dhigaysa barashada qof-ahaaneed (in-person learning) mid bad-qab leh oo suurtoagal u ah qof walba.
- Cilmi -baaristu waxay muujisay in furitaanka dugsiyada guud ahaan aysan si weyn u kordhinaynin gudbinta bulshada iyada oo la adeegsanayo fool-saab/maaskaro iyo talaabooyin kale oo la xiriira bad-qabka ay jiraan.
- Waxaa muhiim ah in la isticmaalo/la adeegsado aalad kasta oo ay ku jirto xirmo ah qalabkeenna (toolkit) si carruurta looga ilaaliyo CAABUQA COVID-19-ban. Guud ahaan Fool-saabka/Maaskarada waa mid ka mid ah aaladahaas waxaana sidoo kale, la xaqiijiyay inuu waxtar u leeyahay ka ilaalinta dadka cudurrada kale ee ah neef -mareenka.
- [Fool-saabka/Maaskaro ayaa sidoo kale ah istaraatiijiyadda/xeeladda ugu wax targa badan ee lagu sameeyo/abuuro farriimo joogta ah /Masking is also the most effective strategy to create consistent messages](#) iyo filashooyin joogto ah ee ardayda dhexdeeda iyada oo aan la haynin culeysyo dheeraad ah oo u baahan in lala socdo xaaladda talaalka qof walba.

Maxay yihiin Tilmaamaha Caafimaadka iyo Bad-qabka Degmadu Raaci doonto?

Hab-raaca/borotokoolka caafimaadka iyo bad-qabka ee la hirgeliyey sanad-dugsiyeedkii hore ayaa lagu talinayaa in la sii wado inta ugu badan ee suurtoogalka ah sannad-dugsiyeedka 2021-2022, oo ay ku jiraan sifeynta hawo-qaadka iyo is-dhaafsiiga hawada dibadda iyo qul-qulka.

- Fool-saabka/maaskarada ayaa looga baahan yahay dhammaan ardayda saaran baska iyo kuwa ku jira dhismayaasha dugsiga talaal ama talaal la'aan;
- Fool-saabka/maaskarada ayaa looga baahan yahay dhammaan shaqaalaha ku jira dhismayaasha dugsiga iyo goobaha maamulka talaal ama talaal la'aan;
- Ugu yaraan 3-dex cagood kala fogaanshaha bulshada marka la isu jirsan karo ficil ahaan;
- Gacmo -dhaqashada iyo nadiifinta gacmaha si joogto ah (gacmo -nadiifiye ayaa laga heli doonaa gudaha dhammaan dhismayaasha iyo fasalada);
- Ilaaha biyaha/tuubooyinka biyaha lama isticmaali doono; biyo dhalo ah ayaa la siin doonaa; isticmaalka dhalooyinka biyaha ee la buuxin karo ayaa la dhiiri gelinayaa;

- Booqdayaasha dugsigu waxay ku koobnaan doonaan waalidiinta/wakiilada iyo la-hawlgalayaasha taageerada ardayga Degmada; booqdayaasha waxaa looga baahan doonaa inay xirtaan fool-saab/maaskaro;
- Fool-saab/maaskaro LOOGAMA baahna dibadda dhismaha; tan waxaa ka mid ah nasashada banaanka/dibadda, safaro banaanka ee dibadda ah (outdoor field trips), ama waxqabadyo kale oo dibadda ah;
- Arday kasta ama xubin kasta oo shaqaale ah ayaa xiran kara fool-saab/maaskaro inta lagu jiro hawlaha bannaanka haddii ay doortaan inay sidaas sameeyaan.

Intee Jeer ayay Degmadu Cusboonaysiin doontaa Qorshaheeda Dhimista CAABUQA COVID-19-ban?

Degmadu waxay sii wadi doontaa inay la socoto hagidda caafimaadka dadweynaha waxayna cusboonaysiisaa hab -raaca caafimaadka iyo bad-qabka si waafaqsan marka macluumaad cusub la helo.

Ma lagu taliyey Kala -qaybiyeyaal/Ilaaliyaal hindhisada ee miisaska ardayga iyo macalinka?

Maya. CDC kuma talinayso miiska kala qaybiya ama ilaaliya hindhisada fasalka dhexdiisa.

Maxay Yihiin Hab-raacyada/Baratakoolada Ku Saabsan Goobaha Bulshada ee La Wadaago?

- Fool-saab/Maaskaro ayaa looga baahan yahay ardayda, shaqaalaha, iyo booqdayaasha.
- Sanduuqyada (lockers) ardayga ayaa la isticmaali doonaa; ugu yaraan 3-dex cagood kala fogaanshaha bulshada marka la adeegsan karo ficil ahaan.
- Musqulaha: ugu yaraan 3-dex cagood kala fogaanshaha bulshada marka la adeegsan karo ficil ahaan.

Kawaran Haddii Ilmahaygu U Baahan Yahay Ka Ka dhaafidda Fool-saabka/Maaskarada Sababo Caafimaadka Darteed?

Haddii aysan jirin wax ka-dhaafitaan ah oo u oggolaanaya ardayga, shaqaalaha, ama booqdaha inay iska xaadiriyaan/imaadaan qof-ahaan (in-person) fool-saab/maaskaro la'aan, xirashada fool-saab/maaskaro habboon waa ku qasab dhammaan gudaha dhismayaasha dugsiga. Waalidiinta rumaysan in ka -dhaafitaannadaani /ka dayntaani ay khuseeyaan carruurtooda waxay geli karaan Foomka Ka -dhaafitaanka Fool-saabka/Maaskarada iyagoo fiirinaya ama soo dejinaya foomka hoose. Sida dhammaan codsiyada ka -dhaafitaanka fool-saabka/maaskarada, talo/amar dhakhtar ayaa loo baahan doonaa.

Kahor intaan la ansixin codsiga ka -dhaafitaanka, qofku/shaqsigu waa inuu xirtaa fool-saabka/maaskarada marka uu joogo gudaha dhismaha dugsiga.

Kuwa hela ka-dhaafitaan ayaa laga yaabaa inay u nugul yihiin fiditaanka CAABUQA COVID-19-ban iyo karantiil suuragal ah maadaama ardaygaas uusan lahayn ilaalin la mid ah kuwa qaata fool-saabka/maaskarada wejiga.

Tilmaamaha qoysaska raadinaya macluumaad ku saabsan ka -dhaafitaannada fool-saabka/maaskarada wejiga ayaa booqan kara [Tilmaamaha Ka -dhaafitaanka Fool-saabka/Maaskarada ee Dugsiyada Magaalada Columbus /Columbus City Schools Mask Exemption Guidelines/](#).

Ardayda iyo Shaqaalaha ma looga baahan yahay inay qaataan Talaalka CAABUQA COVID-19-ban?

Maya. Degmadu waxay si xooggan ugu dhiirri-gelinaysaa qof kasta oo u-qalma inuu helo talaalka CAABUQA COVID-19-ban, oo ay ku jiraan shaqaalaha, ardayda, iyo bulshada, si loo talaalo.

Waa maxay Nadaafadda Neefsashada habboon/Aadaabta Qufaca?

- Adeegso suxulkaaga/jiqilkaaga markaad qufacayso ama hindhisayso;
- Adeegso/isticmaal xaashida afka/fasaleeti oo isla markiiba iska tuur adeegsiga/isticmaalka kadib;
- Fool-saabkaaga/maaskaradaada;
- Ku dhaq/ku nadiifi gacmaha kadib mid kasta oo ka mid ah kuwa kore.

Sideen U Go'aamiyaa Goortaan Ilmahayga Ku Haynayo Guriga?

Ka fiiri ilmahaaga calaamadahan ka hor inta aysan aadin dugsiya maalin kasta. Waa inaad ilmahaaga ku haysaa guriga haddii ay qabaan:

- Heerkulka ka sarreeya 100 darajo;
- Luminta dhadhanka ama urta;
- Cusub ama ka sii daraya:
 - Cune/dhuun xanuun;
 - Qufac ama neefsashada oo adkaata;
 - Diif/duuf ama sanko oo ciriiri ah/xiran;
 - Shuban, lalabbo, ama matag;
 - Madax xanuun, gaar ahaan ay lasocoto qandho;

- Jir/Jidh xanuun;
- Daal.

Waa Maxay Hab-raacyada Go'doominta iyo Karantiilnimada CAABUQA COVID-19-ban?

Degmadu waxay sii wadi doontaa inay raacdo shuruudaha CPH, ODH, iyo CDC ee karantiilidda xiriirada dhow ee kiisaska CAABUQA COVID-19-ban:

- Karantiil ah toban (10) maalmood laga bilaabo taariikhda ugu dambaysay ee soo-gaadhista iyo la -socodka calaamadaha.
- Waxaa kale oo muhiim ah in la xuso sida ku cad/kuxusan CDC, dhammaan dadka xiriirka dhow la leh waa inay sii wadaan la socodka astaamaha 14-ban maalmood kadib xiriir dhow oo lala yeesho qof qaba CAABUQA COVID-19-ban, in kasta oo muddada karantiilku hoos loogu dhigay 10-ban maalmood.
- Dhammaan dhismayaasha dugsiga waa inay aqoonsadaan qolka kala-soocidda caafimaadka ee halkaas oo arday ama xubin shaqaale ah oo muujiya astaamaha CAABUQA COVID-19-ban ay sugi karaan ilaa ay ka awoodaan inay ka baxaan dhismaha. Dugsigu waa inuu sidoo kale ku daraa qorshe ku saabsan sida qolka kala -soocidda caafimaadku u shaqayn doono.
- Karantiil ayaa laga dhaafi karaa haddii arday ama shaqaale laba toddobaad ka hor dhammaystirtaan taxanaha talaalka (labada talaal ee loogu talagalay Pfizer iyo Moderna; hal talaal oo loogu talagalay Johnson iyo Johnson) IYO iyada oo aan lahayn astaamaha CAABUQA COVID-19-ban.
- Sida ku qoran tilmaamaha ODH, ardayda aan la talaalin ee uu ku dhacay fayraska uma baahna in la karantiilo haddii labada dhinac/labada ruux ay xirnaayeen fool-saab/maaskaro, ugu yaraan 3-dex cagood kala fogaansho isu jireen, kuna jireen goob fasal ah. Dhammaan saddexda shuruudood waa in la buuxiyo.

Fiidiyowga tilmaamaha karantiilka: <https://youtu.be/QAGAqOH2TIY>

Ma loo baahan yahay dhaqidida gacmaha?

Haa. Lakabka/ceiyaha labaad ee ilaalinta ka dib fool-saabka/maaskarada waa gacmo -dhaqid. Waxaan hubin doonaa in dhammaan ardayda iyo shaqaalaha ay gacmhooda dhaqaan oo ay faydhowraan/nadiifiyaan marar badan inta lagu jiro maalinta dugsiga. Dhammaan dugsiyada iyo dhismayaasha maamulka Degmadu waxay haysan /yeelan doonaan gacmo nadiifiye/fayo-dhowre.

Fiidiyowga gacmo -dhaqashada: <https://youtu.be/7QfDKOciEu8>

Maxay yihiin Hab-raacyada Caafimaadka iyo Bad-qabka ee Hawlaha Isboortiga iyo Hawlaha Ka -baxsan manhajka?

- Waxqabadyada/hawlaha isboortiga, tababarada, iyo hawlaha ka baxsan manhajka, oo ay ku jiraan koox fanaaniin ah oo garaaca qalabka muusikada marka ay socdaan iyo kooxda qoob -ka -cayaar ah oo si isku mid ah u sameeya qoob -ka -ciyaarka raacayana maqalka muusikada (marching band and drill team), ayaa dib u bilaaban doona si waafaqsan dhammaan tilmaamaha caafimaadka iyo bad-qabka.
- Daawadayaasha gudaha waxaa looga baahan doonaa inay xirtaan fool-saab/maaskaro; tan waxaa ku jira ardayda aan si firfircoon uga qaybqaadanaynin hawsha; 6-lix cagood oo fogaanshada bulshada ee daawadayaasha ayaa lagula talinayaa.
- Ardayda ka qayb-qaadanaysa hawlaha bannaanka LOOGAMA baahna inay xirtaan/xidhaan fool-ssab/maaskaro; tan waxaa ka mid ah daawadayaasha; 6-lix cagood oo fogaanshada bulshada ee daawadayaasha ayaa lagula talinayaa.

Degmadu ma sii wadi doontaa la socoshada Kiisaska CAABUQA COVID-19-ban ee laga soo sheegay Degmada gudaheeda?

Haa. Dugsiyada Magaalada Columbus waxaa ka go'an hufnaan iyo bixinta macluumaad sax ah oo ku saabsan kiisaska CAABUQA COVID-19-ban ee qabitaanka xanuunka/togan (positive) iyadoo la ilaalinayo asturnaanta iyo xog-haynta ardaydeenna iyo shaqaalaha.

Wada -hawl-galayaasheena Caafimaadka Dadweynaha Columbus waxay sii wadaan inay si joogto ah ula wadaagaan macluumaadka iyo xogta hoggaamiyeyaasha degmada. Xogtan waxaa loo heli karaa qoysaska iyo guud ahaan dadweynaha si ay uga daawadaan onlaynka ah www.columbus.gov/publichealth/Coronavirus-Portal.

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay kaloo abuureen, iyadoo kaashanaya Jaamacadda Gobolka Ohio (Ohio State, CATS COVID-19 Dashboard) oo ay ku jiraan xogta tirada qaba xanuunka/togan (positive) ee CAABUQA COVID-19-ban ee loo soo sheegay Degmada. [Guji halkan si aad u aragto /Click here to view the CCS CATS COVID-19 Dashboard](#).

Halkeen Ka Heli Karaa Xog Ku Saabsan Tijaabada/Baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban ee Ardayda?

Haddii ilmahaagu kudhaco xanuunka leh astaamaha (positive) ee CAABUQA COVID-19-ban ee suurtoogalka ah ee dugsiga, waxaa laga yaabaa in ay soo bandhigaan tijaabada/baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban iyadoo lala kaashanayo Isbitaalka Guud ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital). [Fadlan soo dejiso oo soo celi foomka oggolaanshaha \(Please download and return the consent form\)](#). Waa in loo dhammaystiro ilmahaaga si uu u helo baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban. Baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban ee caafimaadka qaba/taban (Negative) AMA muddo 10 maalmood oo karantiil ah oo guriga ah ayaa loo baahan yahay si ilmahaagu ugu soo noqdo dugsiga.

Baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban ee Carruurta Dugsiga ku Xanuunsan

Goorma ayaa ilmahayga lagu baari doonaa dugsiga? Carruurta waxaa laga yaabaa in la baaro haddii ay muujiyaan astaamo u eg CAABUQA COVID-19-ban:

qandho, qufac, neefta oo ku yaraata IYO oggolaansho saxiixan oo uu dhammaystiray waalid ama wakiil. [Eeg/Fiiri macluumaadka ku saabsan astaamaha CAABUQACOVID-19-ban iyo goorta aad guriga joogaysid /View information on COVID-19 symptoms and when to stay at home/.](#)

Ma la i soo wici doonaa ka hor inta uusan baaritaanku dhicin? Carruurta muujisa astaamaha CAABUQA COVID-19-ban waxay u baahan doonaan in laga soo qaado dugsiga IYO sidoo kale waa in ay buuxiyaan shuruudaha baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban. Haddii aad buuxisay foomka oggolaanshaha ka hor dhacdadan, Kal-kaalisada Dugsiga ayaa kaa soo wici doonta lambarka taleefoonkaaga hadda ku jira diiwaankeenna waxayna isku dayi doontaa inay kula hadasho kahor baaritaanka. Hase yeeshee, foomka oggolaanshaha oo dhammaystiran, baaritaanka waa la samayn karaa xataa haddii waalidka/wakiilka la waayo. Haddii aadan horey u-buuxin foomka oggolaanshaha ka hor intaadan kasoo qaadin ilmahaaga, waxaad buuxin kartaa mid markaad timaaddo dugsiga.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu u fadhiisan baaritaanka? Baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban lama samayn doono haddii ardaygu diido baaritaanka ama uusan u-fadhiisan karin baaritaanka. Xaaladahaas, Kal-kaalisada Dugsiga ayaa ardayga u gudbin doonta Isbitaalka Guud ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital) ama bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee ardayga si looga baaro CAABUQA COVID-19-ban.

Waa sidee baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban? Baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban waa suuf (sida qoori/cuud suuf ah oo q- dheer) oo sanko kor loo galinayo oo loogu talagalay tirinta 10. Mar labaad, haddii ardaydu uusan awoodin ama uusan rabin inay iskaashi la sameeyaan baaritaanka, markaa, Kal-kaalisada Dugsiga ayaa ugudbinaysa tixraacaya ardayga oo tagaya Isbitaalka Guud ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital) ama bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee ardayga si looga baaro CAABUQA COVID-19-ban.

Maxaa dhacaya baaritaanka ka dib qabidda XANUUNKA/ TOGAN (POSITIVE)? Waxaa laguugu yeeri doonaa natiijooyinka kal-kaalisada dugsiga iyo Dhakhtarka kal-kaalisada Caafimaadka Guud ee Dugsiga Carruurta (Nationwide Children's School Health nurse practitioner). Tilmaan ayaa lagu bixin doonaa taleefoonka ku saabsan karantiilinta iyo haddii loo baahdo adeegyo dheeraad ah.

Maxaa dhacaya haddii baaritaanka ilmahaygu yahay CAAFIMAAD QABA (NEGATIVE)? Waxaa kuu yeeri doonaa kal-kaalisada caafimaadka oo leh jawaabaha /natiijooyinka oo ku siin doonta tilmaamo ku saabsan goorta ilmahaagu ku noqon karo dugsiga. Haddii ilmahaagu muujinayo astaamaha CAABUQA COVID-19-ban (qandho, qufac, neefta oo ku qabata) dugsiga dibaddiisa, waa inay joogaan guriga oo aysan aadin dugsiga.

Waxa la sameeyo haddii ilmahaagu muujiyo/ka muuqdaan calaamadaha CAABUQA COVID-19-ban oo ah dugsiga dibaddiisa:

Si loogu balamiyo baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban:

- Wac bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah marka hore ama
- Wac Kal-kaalka Baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban ee Kal-kaalisada Guud ee Khadka Carruurta, oo la heli karo 6:30 subaxnimo (a.m.) ilaa 10:30 fiidnimo (p.m.) inta lagu jiro toddobaadka iyo 7:30 subaxnimo (a.m.) ilaa 8:30 fiidnimo (p.m.) maalmaha fasaxa ee dhammaadka toddobaadka wac (614) 722-2787 si aad u samaysato balan si aad ugu baaro goobta baaritaanka ee dariishadda/daaqadda laga qaato (drive-thru). Waa inaad balan samaysataa si aad u hesho baaritaan, ilmahaagu waa inuu muujiyaa calaamado.

Degmadu ma oggolaan doontaa in Bulshadu adeegsato/isticmaasho Dhismayaasha iyo Dhulka CCS?

- Adeegsiga bulshada ee dhismayaasha Dugsiyada Magaalada Columbus ee ururada iyo hay'adaha ka baxsan waa la joojiyay ilaa ogeysiis dambe.
- Adeegsiga bulshada ee bannaanka Dugsiyada Magaalada Columbus ee ah ururada iyo hay'adaha ka baxsan waa la oggol yahay. Codsiyada waa in lagu soo gudbiyaa iyada oo loo marayo Haya'dda (Facilitron).
- Booqdayaasha dugsiga ayaa ku koobnaan doona waalidiinta/wakiilada iyo wada-hawl-galayaasha taageerada ardayga Degmada ayaa laga rabaa inay xirtaan/xidhaan fool-saab/maaskaro.

Maxaan Samayn karaa si aan Ilmahayga Ugu baro/ugula dhaqmo/tuso Guriga Hababka Yaraynta?

Fool-saab/Maaskarada wajiga

- Sharax/faah-faahi sababta aan u xirano fool-saabka/maaskarada;
- Naf-taada Uxiro fool-saabka/maaskarada;
- Saar fool-saab/maaskaro xayawaanada cufan;
- Ka bilow ardayga oo xiran/xidhan fool-saab/maaskaro dhawr ilbiriqsi/ilbidhiqsi ilaa dhawr daqiiqo ilaa wakhti dheeraad ah;
- Kala fogaanshaha bulshada;
- Calaamadee masaafada/isu jirka 3-dex cagood ee sagxadaha guriga oo ciyaar ciyaarid.

Gacmo -dhaqashada

- Ku celceli gacmo -dhaqashada iyo ku heesidda heesta ABC 20 ilbiriqsi/ilbidhiqsi ama heesta Twinkle, Twinkle ama heesta Dhalashada laba jeer.

Halkeen Ka Heli Karaa Cusboonaysiinta Qorshaha Dib-u-furista Degmada ee 2021-2022?

Cusboonaysiinta ku saabsan qorshayaasha dib-u-furitaanka Degmada ee dib-ugu-noqoshada dugsiga ayaa laga heli karaa www.ccsok.us/BacktoSchool.